## Nuxurka

- **Yoolkaka warbixinta**: Faham qodobada ka qayb qaadanaya hoos u dhaca diiwaangelinta ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle (SPS), iyo saamaynta ay arrimahani ku yeelanayaan dugsi waara, tayo sare leh, oo loo siman yahay mustaqbalka
- **Iskaashatada cilmi-baarista:** Kooxda Qorsheynta Diiwaangelinta SPS, shirkadda Xeeladaha Cilmi-baarista ee 360, iyo cilmi-baarayaasha MIT's Blueprint Labs, shaybaar cilmi-baaris siyaasadeed
- **Hababka: 1**) Sameeyay sahamin wakiil ah daryeelayaasha; 2) Isbeddellada la lafa-guray ee hoos u dhaca diiwaangelinta ee Seattle, degmooyinka deriska la ah, iyo magaalooyinka la midka ah; iyo 3) Xogta laga lafaguray arrimo dibadeed, sida xogta dhaqdhaqaaqa qoyska
- **Macluumaadka sahanka:** Xeeladaha 360 ayaa sameeyay sahan wakiil ah (oo lagu bixiyo Ingiriisi, Isbaanish, Cantonese, Fiyatnaamiis, Soomaali, iyo Amxaari) iyadoo loo eegayo lab iyo dheddig, jinsi, iyo juqraafiga daryeelayaasha ardayda hore iyo kuwa hadda. Sahan aan matalin ayaa lagu sameeyay xannaaneeyayaasha ardayda aan waligood dhigan SPS. Dhammaan ka qaybgalayaasha sahanku waxay u deggan yihiin Seattle sababtoo ah kharashka iyo caqabadaha suurtagalka ah. Sahanku waxa uu ururiyay 1,420 jawaabood oo la gaadhay iyada oo lala xidhiidhay ku dhawaad 125,000 oo qaangaar ah.

## Natiijooyinka Muhiimka ah

### Guudmarka ntiijooyinka sahanka

- **Ku qanacsanaanta SPS:** Ardayda hadda dhigata, 86% waxay ku qanacsan yihiin SPS. 66% ardaydii hore iyo 53% ardayda aan waligood dhiganin kuma qanacsana SPS.
- **Waxyaabaha dadku kujecel yihiin SPS** (sida ay u kala badan yihiin, oo la mid ah ardayda hadda iyo kuwii hore): Dareen lahaanshaha iyo bulshada, macallimiinta heeganka ah iyo daryeelka, iyo u dhawaanshaha dugsiga iyo guriga
- **Waxyaabaha dadku aaney ku jeclayn SPS** (sida ay u kala badan yihiin, oo la mid ah ardayda hadda iyo kuwii hore): Walaaca ku saabsan tayada waxbarashada iyo manhajka oo buux dhaafiyay fasallo, dhaqaale la'aan iyo ciriiri.
- **Sababaha suurtogalka u ah ka bixitaanka** (sida ay u kala badan yihiin ardayda hadda): Walaaca ku saabsan tayada waxbarashada, ikhtiyaarka wanaagsan ee la heli karo, dareenka badbaado la'aanta, iyo manhajka la baro
- **Mudnaanta koowaad ee mustaqbalka SPS** (sida ay u kala badan yihiin ardayda hadda): Hagaajinta tayada waxbarashada iyo kordhinta maalgelinta iyada oo la dhimayo xajmiga fasalka iyo hagaajinta hawlaha dugsiga
- Laba ka mid ah shantii daryeele ee ardaydii hore ayaa sheegay inaysan ka fiirsan doonin dib-u-diiwaangelinta SPS. Kuwa aad ugu furfurnaa dib-u-diiwaangelinta waxay soo xiganayeen horumarro xagga tacliinta ah oo ka badan qodobbada kale sababta dib-u-diiwaangelinta.

## Tilmaamaha hoos u dhaca diiwaangelinta

- **Tirada ardayda kindergarten-ka oo sii yaraanaysa**: Heerka carruurta ku dhalatay Seattle ee iska diiwaangeliyay xanaanada aad ayuu hoos ugu dhacay tan iyo 2012. Tirada kooxda xannaanada ayaa si joogto ah hoos u dhacday: kooxda 2023 waxay ahayd 3,714 arday marka la barbar dhigo celceliska kooxda xannaanada kahor-COVID oo ahayd 4,668 arday. Fasalkan barbaarinta ee sii yaraanaya ayaa xisaabiya inta badan hoos u dhaca diiwaangelinta SPS.
- **Hoos u dhac ku yimid qoysaska carruurta leh**: Qoysaska carruurta leh ee ku nool Seattle waxay hoos u dhaceen 16% tan iyo 2017. Ku dhawaad 70% qoysaska carruurta leh ee Seattle ka guuray waxay ka guureen gobolka, halka 15% ay u guureen meelo kale oo ka tirsan degmada King County.

## Qodobada aan kamidka ahayn hoos u dhaca weyn ee diiwaangelinta

- **Lambarka ardayda ka tagtay dugsiyada oo aan isbedelin wax weyn:** Boqolkiiba ardayda ka tagtay tan iyo 2011 waxay isbedbedeshay inta u dhaxaysa 5% iyo 7% wadarta isqorista.




- **Isbeddelka diiwaangelinta dugsiyada khaaska ah:** Intii u dhaxaysay 2019 iyo 2023, diiwaangelinta dugsiyada gaarka ah ee King County (ay ku jirto Seattle) ayaa kordhay 3,182 arday. Isla muddadaas, 11,131 arday ayaa ka baxay SPS. Xitaa haddii arday kasta oo cusub oo dugsi gaar loo leeyahay oo ku nool King County uu ka yimid SPS, tani waxay sharraxaysaa 25% ardaydii ka tagtay degmada intii lagu jiray COVID.

## Saamaynta sinaanta jinsiyadaha

- Ardayda Madowga, Dhaladka Maraykanka, iyo Jasiiradaha Baasifiga waxay uga tageen degmada qiimo ka sarreeya ardayda Latino, jinsiyadaha kala duwan iyo kuwa caddaanka ah.
- Laba+ qol jiif oo dakhli lagu kabo ayaa soo saara ardayda SPS ugu badan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta la'aan weyn oo ah guryo la awoodi karo oo heerka qoyska ah.

## Tallabooyinka xiga iyo dhaq dhaqaaqyada la soo jeediyey

SPS maaraynta u soo jeedisey hoos u dhaca diiwaangelinta ee muraayadda qaabdhismeedka - sidee baan u abuuri karnaa nidaam si wanaagsan u taageera ardayda, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda? Waxaan bixinaa talooyin ku wajahan dhamaadkan kuwaas oo ka jawaabaya natiijooyinka.

- Diirad saaridda la shaqaynta ardayda fasalada barbaarinta, taasoo la macno ah daryeelayaasha ardayda pre-K iyo sidoo kale pre-K iyo la-hawlgalayaasha daryeelka ilmaha, si loo kordhiyo boqolkiiba carruurta iska diiwaan geliya SPS ee xanaanada iyo wixii ka dambeeya.
- Ka-qaybgalka bulshada SPS ee ku saabsan manhajka iyo waxbaridda.
- Hilitaanka ardayda aan “lagu xisaabtamin” oo dib uga soo gal SPS.
- Abaabulka koox-hawleed kooxo gaar ah oo ardayda midabka leh iyo sababaha ay uga baxaan SPS, oo ay ku jiraan ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada.
- Sii wadidda iskaashi la yeelashada wakaaladaha magaalada si aad wax uga qabato helitaan guriyeynta qoysaska.
- Samaynta cilmi-baaris dheeraad ah oo ku saabsan sida degmooyinka iyo magaalooyinka u dhow, sida Minneapolis iyo Atlanta, ay u kordhiyeen diiwaangelinta ardayda sannadihii u dambeeyay.